

KU DHAQAN XAFIIS D.



Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I

Muqadisho, 2 Lunyo 1973

L. 12

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

SHARCI L. 4 GUDDOONSHABA GOLAHA SARE EE
KACAANKA, 10 Juunyo 1973 — *Beddelaad Sharciga
Jenaiga ah.*

Bog. 191

SHARCI L. 5 GUDDOONSHABA GOLAHA SARE EE
KACAANKA, 24 Juunyo 1973 — *Hirgelinta Heshiisyadi
Dekedda Muqdisho.*

» 192

SHARCI L. 5 GUDDOONSHABA GOLAHA SARE EE
KACAANKA, 24 June 1973 — *Ratification of the
Agreements on Mogadishu Port Project.*

» 194

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADDEED

XEER GUDDOONSHABA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA L. 64, 10 Juunyo 1973 — *Toosin Xeerka
Tiradiisu tahay 74 ee soo baxay 22kii Abril 1972 kuna
saabsan Wakaaladaha Madaxa Banaan ee Dowladda.*

» 196

XEER WASAARADDA CADDAALADDA IYO AA. DIINTA L. 65, 11 Juunyo 1973 — *Magacaabid (Assessori)*
Maxkamadda (Corte Assise) ee Rafcaanka Mudug Sanadka 1973.

Bog. 197

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSHN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

| | |
|---|----------|
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 18 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Salim Cubeyd Sacid.</i> L. 91. | Bog. 198 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 18 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Cabdullahi Cigaal Nuur.</i> L.92. | » 198 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Suuban Warsama Moxamed.</i> L. 93. | » 199 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Casha Yusuf iyo Mariam Yusuf.</i> L. 94. | » 199 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Sharakada S.V.I.L.A.</i> L. 95. | » 200 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 24 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Moxamed Burale Ismail.</i> L. 96. | » 200 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 24 Juunyo 1973 — <i>Naada Dhul Cabdi Kulmie Cilmi.</i> L. 97. | » 201 |
| F.I.M.A. - S.p.A.,24 Juunyo 1973 — <i>Isukeenid Hadalka Isu Imaatinka Caadgia ah.</i> L. 98. | » 202 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, 23 Juunyo 1973 — <i>Dhumidda Buugga L.</i> 5856 Sh. So. 3.243,50. L. 99. | » 203 |

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

SHARCI L. 4 GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyo 1973.

Beddelaad Sharciga Jenaiga ah.

GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO TIX GELINAAYA Go' aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qoddobka 1aad

Shaqaalaha Dawladda «Pubblico Ufficiale» waxaa loo la jeeda kuwa lagu tilmaamay Qoddobka 240 (e) ee Sharciga Habka Ciqaabta, waxaa kale oo lagu dary shaqaalaha Sharikadaha, mashruucyada iyo waxii la mid ah ee Dawladdu qayb ama dan caam ah ku leedahay.

Qoddobka 2aad

Dhinaca sharciga Jenaiga ah Maamulka Guud «Public Administration» waxaa loo la jeeda Maamulka Dawladda, Wakaaladaha iskood u madax banaan «Ente Pubblico», Sharkadaha, mashruucyada iyo waxii la mid ah oo Dawladdu qayb ama dan caam ah ku leedahay.

Qoddobka 3aad

Sharikada kasta iyo mashruuc kasta oo Dawladdu qayb ku leedahay qofkii dembi ka gala, waxaa lagu qaadayaa xeerarka lagu qaado dadka dawladda dembi ka gala, wxaana ilaalinaaya sharciga ama xeerarka u degsan Xoolaha Dawladda.

Qoddobka 4aad

Wixii dembi ah oo horay looga galay Sharikadaha, mashruucyada iyo wixii la mid ah ee uu sheegaayo Qoddobka 2aad ee Sharcigan, ee aan xukun weli ku dhammaan «Sentenza definitiva» waxaa lagu qaadayaa sida sharcigani qabo.

Qoddobka 5aad

Waxaa la tirtiray sharci kasta ama xeer kastsa oo shacrigan ka soo hor jeeda ama aan la soconeyn.

Qoddobka 6aad

Sharcigani waxuu dhaqan gelaya 19ka Abril 1973, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Qofkasta waxaa khasab ku ah in uu dhawro sharcigan.
Muqdisho, 10 Junyo 1973.

Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre
GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KECAANKA

SHARCI L. 5 GUDDOONSHAHAA GOLAHA SARE EE KACAANKA

24 Junyo 1973.

Hirgelin Heshiisyadii Dekedda Muqdisho.

GUDDOONMIYAHAA
GOLAHA' SARE EE KACAANKA

ISAGOOG ARKTY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanca;
ISAGOOG ARKAY Qaanuunkii 47 ee Augosto 18, 1970;
ISAGOOG MAGLAY Golaha Xoghayayaasha;
SOONA JEEDIYEY Xoghayaha Lacagta;

WUXU GOOYEY SOONA SAARAY

Sharciga Soo socda:

Qodob 1

Aqbalid Heshiisyadii Mashruuca Dekadda Muqdisho Hesbiisyada hoos ku qoran waa la aqbalay:

- a) Heshiiskii Amaahda ee Horumarinta labarkiisuna yahay 359-SO, lacagtiisuna tahay US Dollars 12.950.000 (laba iyo toban milyan sagaal boqol iyo konton kun oo Dollar) oo dhex maray 15kii Marso 1973 Jamhuuriyadda Dawladda Dimuqradiga Somaliya iyo Ururka Horumarinta ee Dunida — International Development Association.

- b) Heshiiskii Mashruuca oo dhix maray 15 Marso 1973 Ururka Horumarinta ee Dunida iyo Wakaaladda Dekedaha ee Somalia.
- c) Heshiiskii Mashruuca oo dhix maray 15kii Marso 1973 Jamhuuriyadda Dimuqradiiga ee Somaliya iyo Beesha Dhaqaalaha Yurubka — European Economic Community iyo Ururka Horumarinta ee Dunida.
- d) Heshiiska ku magacaaban «Convenzione di Finanziamento» oo dhix maray 22kii December 1972 Jamhuuriyadda Dimuqradiiga ee Somaliya iyo Beesha Dhaqaalaha Yurubka.
- e) Heshiiska amaah gudbiska — Subsidiary Loan Agreement — oo dhix maray 11kii February 1973 Dawladda Somaliyed iyo Wakaaladda Dekedaha ee Somalia.

Qodob 2

Xeer gelin

Heshiisyada kor ku sheegan:

- a) Waxay ka mid yihiin Qawaniinta iyo Sharciyada dalka Jamhuuriyadda Dimuqradiiga ee Somaliya.
- b) Qofkastaba waa inuu socodsiiya, dhawraana.

Qodob 3

Dhagan gelin

Go'aankani wuxuu dhaqan galaya haddadaan, waana in lagu qora faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Junyo 1973.

GUDDOOMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle Sareeye Gaas Moxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Wasaaradda Lacagta
Jaalle M. Y. Weyrax

LAW N. 5 of 24 June 1973.

Ratification of the Agreements on Mogadishu Port Project.

THE PRESIDENT
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The 1st and 2nd Charter of the Revolution;

HAVING SEEN The Law 47 of August 18, 1970;

HAVING HEARD The Council of State Secretaries;

ON THE PROPOSAL of the Secretary of State for Finance;

HEREBY PROMULGATES

Article 1

Ratification of Agreements

The below mentioned agreements on the financement and implementation of the Modishu Port Project, are hereby ratified:

- a) The Development Credit Agreement dated March 15, 1973, in an amount equivalent to US Dollars 12.950.000 (Twelf million ninehundredfifty thousand), between the Somali Democratic Republic and the International Development Association.
- b) The Project Agreement dated March 15, 1973 between the International Development Association and the Somali Port Authority.
- c) The Administration Agreement dated March 15, 1973 between the Somali Democratic Republic and the European Economic Community and the International Development Association.
- d) The Commission Agreement «Convenzione di Finanziamento» dated December 22, 1972 between the Somali Democratic Republic and the European Economic Community.
- e) The Subsidiary Loan Agreement dated February 11, 1973 between the Government of the Somali Democratic Republic and the Somali Ports Authority.

Article 2

The above mentioned Agreements:

- a) Shall have the force of Law in the Somali Democratic Republic.

- b) All persons shall be required to observe them, and cause other to observe them, as a Law of the Republic.

Article 3

Entry into Force

This Law shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 24 June, 1973.

Jaalle Major Gen. Mohamed Siad Barre
PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council

Jaalle M. Y. Weirah
Secretary of State for Finance

BOGGA LABAAD XEER DOWLADDEED

**XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA
10 Juunyo 1973, L. 64.**

Toosin Xeerka Tiradiisu tahay 74 ee soo baxay 22kii Abril 1972 kuna saabsan Wakaaladaha Madaxa Banaan ee Dawladda.

**GUDDOONSHAH A
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGA OO TIX GELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

**WUXUU XEERAYAA
Qoddobka 1aad**

Toosin Qoddobka 31aad ee Xeerka Wakaaladaha Dawladda

Qoddobka 31aad xubinta 1aad ee Xeerka uyaala Wakaaladaha Dawladda tiradiisuna tahay 74 soona baxay 22kii Abril 1972dii waa la toosiyey iyadoo lagu beddelaaayo tixda soo socota oo noqon doonta xubinta 1aad Qodobka 31aad:

«Gunnada safarka ee Shaqaalaha Wakaaladaha madaxa banaan waxaa lagu bixin doonaa nidaamka ku qoran bogga ku lifaaqan sharcigan qaybtiisa «C» Schedule «C» Safarka Dibedda iyo «D» oo saameyneysa Gunnadda Safarka Gudaha.

**Qoddobka 2aad
*Hirgelin***

Xeerkani wuxuu hirgelayaa 22kii Abril 1972kii.

Muqdisho, 10 Juunyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre
GUDDOONSHAH A
GOLAHA SARE EE KACAANKA*

XEER WASAARADDA CADAALADDA IYO DIINTA

11 Juunyo 1973, L. 65.

Magacaabid (Assessori) Maxkamadda (Corte Assise) ee Rafcaanka Mudug,
Sannadka 1973.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKUU ARKAY Warqaddii koowaad ee kacaanka;

MARKUU ARKAY Xeerrkii soo baxay 21dii Oktobar, 1969;

MARKUU ARKAY Xeerkii soo baxay 3dii Juun, 1962, Lambar 14
ee Nidaamka Dawladda iyo wixii iska beddelay;

MARKUU ARKAY Qodobka 26, faqrada koowaad, ee Xeerkii Ta-shriiciga ahaa 12 Juun 1962, Lambar 3, ee Nidaamka Qadaha ah.

XEER

Qodobka 1

Jaallayaasha aynu hoos kusoo sheegi doonno, waxaa loo magacaab
bay inay ka noqdaan (Assessori) Maxkamadda Corte Assise ee Rafcaanka,
Mudug sannadka 1973.

- 1) Dr. Dahir Cali Maxamud
- 2) Dr. Maxamed Yusuf Cabdulle
- 3) Maxamud Xashi Xandulle
- 4) Cali Maxamed Axmed
- 5) Yusuf Shikh Cali Madar
- 6) Barre Cise Farax
- 7) Maxamed Cabdulle Fadhye
- 8) Saciid Jamac Xusen
- 9) Farax Cabdi Sabriye
- 10) Xaji Cabdurahman Cabdulle
- 11) Faduma Cali Dheere
- 12) Maymuuna Xasan Cadde.

Dekreetadani waxay leedahay dhaqan deg-deg ah.

Muqdisho, 11 Juun. 1973.

Jaaalle Dr. Cabdusalam Sh. Xusen
XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Cadaaladda iyo Diinta

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 182.

Mosca il 16 Giugno 1973.

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSHIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Salim Cubeyd Sacid, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 9-4-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibus, oo leh qiyas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya $12 \times 12 = 144$ mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Shikh Caweys; Galbeed Cawad Mubarak; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 18 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 91) Inj. Cabdicarim Cige Guleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullahi Cigaal Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-5-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Valle Nord, oo leh qiyas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya $20 \times 20 = 400$ mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur G. dhul lam. 8; Galbeed G. dhul lam. 2; Bari G. dhul lam. 4.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 18 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(L. 92) Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Suuban Warsama Moxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 9-6-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21da Oktobar, oo leh qiyaas rektangulare (20x30) kuna fadhiya 600 — mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 838; Galbeed dhul L. 833; Bari dhul 835.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 21 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Cabdikarim Cige Guled

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Casha Yusuf iyo Mariam Yusuf, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 1 November 1959, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 33x11,7 — 386,10 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jidka M. Mukarama; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Xajiya Batula.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 21 Juunyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A P A D H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Sharakada S. V. I. L. A., u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 3-6-1973, uu ku weydiisánayey dhul dhismo dowlaadeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaqshid, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 20.000 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Dhul dawlaaddeed; Galbeed Jidka Balcad; Bari Dhul dawlaaddeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 21 Juunyo 1973.

(L. 95) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Cadikarim Cige Guled

WASAARADDA HAWLAHA GIUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Moxamed Burale Ismail, u usoo qortay qaybta Dhismaha iyo Dhulka 30-5-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladdeed kuna yaal Muqdisho xafadda Madina, oo leh qiyaas rektangular (19,30x12), kuna fadhiya 231,30 mdh.

Soohdin: Waqooyi Xaji Mox'ud; Kofur Cabdulqadir Ismail; Gal-beed Jid: Bari Mox'ed Cise.

Qofkii dannaynayaawuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 24 Juunyo 1973.

Maamulaha Qayhta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Kulmiye Cilmi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17-6-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 30x30 — 900 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Cabdi Xashi; Galbeed Jid; Bari Cabduraxman Caydid G. Lam. 991-60.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 24 Juunyo 1973.

(L. 97)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Cabdikarim Cige Guled

F. I. M. A. — S. p. A.

oo saldhiggeedu yahay Muqdisho

Maalka asaasiga u ah Sharikadda dhammaanna lugu shubay Shs. So. 1.100.000

ISU-KEENID HADALKA ISU-IMAATINKA CAADIGA AH
Tixraacid hadalkii isu-imaatinka caadiga ah, ee Qeyblayaasha ee
lugu qabtay saldhigga maalinta 3da Juunyo 1973, luguna qabtay Xamar,
laguna gaaray go'aannada hoos ku qoran:

- 1) Oggolaashada Misaaniyadda iyo Dheef-Deynta ee ku eg
31-12-1972, waxa raaca inta buura ah ee kasoo baxay Xisabta
Nidaamsan (Conti d'Ordine):

MISAANIYADDA:

| | |
|--------------|-----------------------|
| Lacag Gashay | Shs. So. 3.041.151,10 |
| Lacag Baxday | » » 2.740.997,52 |
| Faaiido | Shs. So. 300.153,58 |

XISAABTA DHEEF IYO DEYNTA:

| | |
|------------------|---------------------|
| Kharaj | Shs. So. 492.803,58 |
| Faaiido lacag | » » 792.957,16 |
| Faaiido sida kor | Shs. So. 300.153,58 |

- 2) Maamulaha Guud in loo doortay markale in uu maamulo shaqada, ee sannadka 1973-1974, Jaalle Brera Alfredo.

Muqdisho, 24 Juunyo 1973.

(L. 98)

MAAMULAHAGUUD

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

Waxaa aqriyey dacwaddaan;

Markaan arkay waxay ku saabsantahay ogeysiiskii bangiga kaydiska iyo Daynta ee aan ogaaday in ay tahay shaqada xafiiskaan, markaan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadaynayaan dumidda buugga L. 5856, Sh. So. 3.243,50 (sadexkunlababoqolafartaniyo sadex shilin iyo 50 senti).

Waxaa amrayaa in loo cusbooneysiyo Xuseen Xasan Cali muddo 30 (sodonberi) ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale haddan la helin qof kale oo bugga sheegta.

Waxaa kaloo la caddeynayaan in bugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaalad aan shaki ku hirin, iyadoo la-suggayo 30kaas beri oo kor ku qoran.

Muqdisho, 23 Ottobre 1973.

(L. 99)

GUDDOOMIYAH A MAXKAMADDA
Dr. Xuseen Sh. Cabduraxmaan
